URURKA QALINJABIYEYAASHA SOOMAALIYEED EE TURKIGA

GOLAHA SARE EE URURKA

Tixraac: GS00122

Taariikhda: 01/09/2022

**Ansixinta Dib U Eegista Xeerka Dhismaha Ururka Qalinjabiyeyaasha Soomaaliyeed Ee Turkiga**

Golaha sare ee Ururka Qalinjabiyeyaasha Soomaaliyeed ee Turkiga oo gudanaaya waajibaadka ka saaran ansixinta iyo wax ka baddalka hindise sharciyeedyada ay u soo gudbiyaan Golaha Fulinta ee ururka, ayaa 29-ki Juun, 2022 golaha fulinta ka guddoomay hindisaha wax ka baddalka xeerka dhismaha ururka ee uu tirsigiisu yahay lambar 1.

Golaha Sare ee ururka oo durba billaabay akhrinta hindise sharciyeedka ay golaha fulinta u soo gudbiyeen, ayaa muddo labo bil ah (Luulyo iyo Agoosto, 2022) isku howlay horumarinta iyo wax ku kordhinta hindise sharciyeedka. Golaha Sare oo muddada uu howsha akhrinta iyo wax ka baddalka ah ku jiray qodobbada qaar la tashi kala yeeshay Golaha Guud ee ururka ayaa ugu danbayn 1-da Sibteember, 2022 aqlabiyad buuxda ku ansixiyay nuqulka ugu danbeeyay ee hindise sharciyeedka oo ah midka warqaddan ku lifaaqan. Waxaa xusid mudan in qodobbada khuseeya muddo xilleedka golaha sare iyo midka fulinta ay dhaqangeli doonaan marka uu dhamaado muddo xileedka hadda socda ee dhamaanaya Febraayo, 2024.

Fariida Ibraahim Nageeye

Guddoomiyaha Golaha Sare

Xeer Lambar 1

# XEERKA DHISMAHA URURKA QALINJABIYEYAASHA SOOMAALIYEED EE TURKIGA

1 Sibteembar, 2022

## QODOBKA 1aad

## ERAY-BIXIN

Erayadan soo socda meel kasta oo lagu adeegsado sharcigan dhexdiisa waxaa loola jeedaa macnaha mid walba ku hor qoran:

B. **Ururka:** waxaa loola jeedaa Ururka Qalinjabiyeyaasha Soomaaliyeed ee Turkiga.

T. **Golaha Guud:** waxaa loola jeedaa xubnaha Ururka Qalinjabiyeyaasha Soomaaliyeed ee Turkiga ee aan ka tirsaneen Golaha Sare iyo Golaha Fulinta.

J. **Golaha Sare:** waxaa loola jeedaa toddobo xubnood oo Golaha Guud ee Ururka ay seddexdii sannaba mar doortaan.

X. **Golaha Fulinta:** waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Golaha Fulinta oo ay Golaha Sare ee Ururka seddexdii sanaba mar doortaan iyo xubnaha uu guddoomiyaha la shaqeeya ee uu magacaabo.

KH. **Xelli doorasho:** waxaa loola jeedaa 3 sano.

## QODOBKA 2aad

## MAGACA IYO XARUNTA URURKA

B. Magaca ururka waa "Ururka Qalinjabiyeyaasha Soomaaliyeed ee Turkiga".

T. Xarunta dhexe ee ururka waa magaaladaMuqdisho.

J. Ururku wuxuu wakiillo ku yeelanayaa dhamaan gobollada Soomaaliya.

## QODOBKA 3aad

## QEEXIDDA IYO UJEEDDADAURURKA

B. Ururka Qalinjabiyeyaasha Soomaaliya ee Turkiga waa urur ay ku midaysan yihiin aqoonyhannada Soomaaliyeed ee Turkiga wax ku bartay.

T. Ujeeddooyinka ururka waa:

1. Isku xirka aqoonyahannada Soomaaliyeed ee wax ku bartay dalka Turkiga.
2. Hormarinta xiriirka iyo iskaashiga Soomaaliya iyo Turkiga ee dhanka cilmibaarista, waxbarashada, dhaqanka, ganacsiga, siyaasadda, arrimaha bulshada iyo wixi lamid ah.
3. Sare u qaadidda tayada aqooneed ee xubnaha ururka iyo ka shaqaynta sida ay uga dhex muuqan

lahaayeen bulshada ay la nool yihiin.

**QODOBKA 4aad**

**QAAB-DHISMEEDKA URURKA**

Ururka wuxuu ka kooban yahay seddex gole oo kala ah:

B. Golaha Guud (xubnaha ururka oo dhan)
T. Golaha Sare
J. Golaha Fulinta

**QODOBKA 5aad**

**GOLAHA GUUD/XUBNAHA URURKA**

**SHURUUDAHA XUBINNIMADA URURKA**

Ururka waxaa xubin ka noqon kara qof walba oo buuxiya shuruudaha xubinnimada ururka ee kala ah:

B. Muwaaddin Soomaali ah, oo mid kamid ah heerarka kala duwan ee waxbarashada rasmiga ah ku soo qaatay dalka Turkiga, inta badanna ku sugan gayiga Somaaliya.
T. Diyaar u ah dhawrista xeerarka, mabaadi'da iyo siyaasadaha ururka.
J. Diyaar u ah bixinta qarashka xubinnimada ururka ee uu jaangooyo Golaha Sare ee ururka.
X. U gudbinta golaha fulinta codsi diiwaangelin iyo dukumiintiyada caddaynaaya ka soo qalinjabintiisa dalka Turkiga.

**QODOBKA 6aad**

**XUQUUQDA XUBNAHA URURKA**

Xubin kasta ee buuxisa shuruudaha ku xusan qodobka 5aad ee sharcigan, isla markaasna loo diiwaangeliyo xubinnimada ururka waxay xaq u leedahay:

B. Helidda kaarka aqoonsiga ee ururka.
T. Ka qaybgalka doorashooyinka iyo howlaha kale ee uu ururka qabto.
J. Ka faa'iidaysiga adeegyada uu ururka bixiyo iyo kaalmooyinka uu ururka helo.
X. Helidda xogta la xiriirta hawlaha iyo qorsheyaasha ururka.

## QODOBKA 7aad

## WAAJIBAADKA XUBNAHA URURKA

Si ay xubint uga faa'iidaysto xuquuqda ku qoran qodobka 6aad ee sharcigan waxaa waajib ku ah:

B. Dalbashada kaarka aqoonsiga ururka iyo bixinta kharashka samayntiisa. Haddii uu kaarka dhumo waa in ay xubintu warqad caddayn ah ka keento saldhigga degmada uu kaarka uga lumay, waana in ay bixiso qiimiha rasmiga ah ee kaarka aqoonsiga oo lagu daray %5 oo ganaax ah.
T. Bixinta qarashka xubinnimada ee uu jaangooyo Golaha Sare ee Ururka. Xubintii aan bixin qarashka xubinnimada muddo 4 bilood ah waxay lumin doontaa xaqa ka qaybgalka doorashooyinka ee ah in la doorto ama ay wax doorato.
J. Ka qaybqaadshada hawlaha ururka.
X. U hoggaansamidda xeerarka ururka, iyo dhowrista anshaxa iyo siyaasadaha ururka.

## QODOBKA 8aad

## GOLAHA SARE

Golaha sare ee ururka waa golaha isku xira Golaha Guud iyo Golaha Fulinta wuxuuna ka kooban yahay 7 xubin.

## QODOBKA 9aad

## SHURUUDAHA XUBINNIMADA GOLAHA SARE

Qofka u tartamaya xubinnimada golaha sare waa in uu yahay qof:

B. Xubin ka ah golaha guud ugu yaraan hal xelli doorasho oo u dhiganta 3 sano.
T. Haysta ugu yaraan shahaaddada heerka koowaad ee jaamacadda.
J. Lagu yaqaan anshax wanaag.
X. Aan lagu laheen khidmada xubinnimada ee uu jaangooyay Goluha Sare muddo 4 bil ah.

**QODOBKA 10aad**

**QAAB-DHISMEEDKA GOLAHA SARE**

B. Golaha Sare wuxuu ka kooban yahay toddobo xubnood.

T. Waxaa dooranaya golaha guud/ xubnaha ururka

J. Golaha Sare wuxuu iska dhex dooranayaa Guddoomiye, Ku Xigeen iyo Xoghaye

K. Habraaca doorashada Guddoomiye, Ku Xigeenka iyo Xoghayaha waxaa lagu qeexi doonaa xeer hoosaadka Golaha Sare.

**QODOBKA 11aad**

**KULAMADA GOLAHA SARE**

B. Haddii aysan jirin xaalad degdeg ah oo u baahan go'aan qaadashada Golaha Sare, golaha wuxuu shirayaa seddexdi bil hal jeer, taas oo u dhiganta afar jeer sannad walba.

T. Hannaanka kulammada iyo habraaca shaqada Golaha Sare waxaa lagu qeexi doonaa xeer hoosaadka Golaha Sare.

**QODOBKA 12aad**

**SHAQADA GOLAHA SARE**

B. Dejinta iyo wax ka baddalka xeerarka, siyaasadaha iyo istiraatijiyadda ururka, iyo ansixintooda marka uu Golaha Fulinta soo jeediyo.

T. Doorashada, la xisaabtanka iyo xil ka qaadista Guddoomiyaha Golaha Fulinta. Guddoomiyaha Golaha Fulinta waxaa xilka looga qaadi karaa codka seddex meelood laba meel xubnaha Golaha Sare oo u dhiganta shan xubnood.

J. Ansixinta xubnaha Golaha Fulinta marka uu soo magacaabo Guddoomiyaha Golaha Fulinta.

X. Kormeerista howlaha Guddiga Fulinta iyo ka doodista warbixinnada ay soo gudbiyaan.

KH. Ansixinta miisaaniyadda sannadlaha ah marka ay soo diyaariyaan Golaha Fulinta.

D. Go'aan ka gaarista xiriirrada iyo iskaashiyada ururka la leeyahay ururrada kale.

## QODOBKA 13aad

## MUDDADA XIL HAYNTA GOLAHA SARE

Muddada xil-haynta Golaha Sare waa seddex sano, oo xubin walba hal jeer dib loo dooran karo.

## QODOBKA 14aad

## WAAYISTA XUBINNIMADA GOLAHA SARE

Xubinnimada Golaha Sare waxaa lagu waynayaa mid ka mid ah arrimaha soo socda:

B. Iscasilaad qoraal iyo af ah

T. Geeri

J. Xanuun dhanka dhimirka ah

X. Shaqo gudasha la'aan joogta ah ama ka maqnaanshaha seddex kulan oo isku xigta cudurdaar la'aan.

KH. Ku kicidda wax ka soo hor jeeda xeerarka iyo anshaxa ururka.

D. Xil ka qaadista ku timaada sababaha ku xusan faqradaha X iyo KH ee qodobkan, waxay ku ansaxaysaa codka seddex meelood labo meel xubnaha Golaha Sare, marka laga reebo xubinta/xubnaha xilka laga qaadayo. Xubinta habraacan xilka looga qaado waxaa baddalkeeda soo dooranaya Golaha Sare ee ururka.

## QODOBKA 15aad

## GOLAHA FULINTA

Golaha Fulintu wuxuu ka kooban yahay Guddoomiyaha Golaha Fulinta, Guddoomiye Ku Xigeenka, Xoghaye, Wakiil Gobaleedyada Ururka, Madaxa Maaliyadda iyo xubnaha kale ee uu Guddoomiyaha Golaha Fulintu uu lagama maarmaan u arko.

**QODOBKA 16aad**

**SHURUUDAHA GUDDOOMIYAHA GOLAHA FULINTA**

Guddoomiyaha waxaa loo dooran karaa qofka soo buuxiya shuruudaha hoos ku xusan ee kala ah:

B. Xubin ka ah Golaha Guud ee ururka ugu yaraan hal xelli doorasho.
T. Si joogta ah ugu shaqayn kara xarunta dhexe ee ururka.
J. Aan lagu lahayn khidmada xubinnimada ee uu jaangooyay Golaha Sare muddo 4 bil ah.

**QODOBKA 17aad**

**MASUULIYADDA GUDOOMIYAHA GOLAHA FULINTA**

B. Hoggaaminta Golaha Fulinta iyo shir guddoominta kulamadiisa.
T. Magacaabista iyo xil ka qaadista xubnaha Golaha Fulinta.
J. Kormeeridda iyo la xisaabtanka xubnaha Golaha Fulinta.
X. Magacaabista xil cusub iyo baabi'inta xil hore u jiray, iyo ka ansixinta Golaha Sare.

**QODOBKA 18aad**

**MUDDO XILEEDKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA FULINTA**

Muddada xil haynta Golaha Fulinta waa seddex sano oo hal mar dib loo soo dooran karo.

**QODOBKA 19aad**

**XIL WAAYISTA GUDDOOMIYAHA GOLAHA FULINTA**

Guddoomiyaha Golaha Fulintu wuxuu xilka ku weyn karaa mid ka mid ah arrimaha soo socda:

B. Iscasilaad qoraal iyo af ah ee uu gudbiyo Golaha Sare ee ururka.
T. Geeri
J. Xanuun dhanka dhimirka ah
X. Shaqa gudasha la'aan la xiriirta qodobka 17-aad ee xeerkan oo xusaya waajibaadka guddoomiyaha
KH. Ku kicida wax ka hor imaanaya xeerarka iyo anshaxa ururka, isla markaasna dhaawacaaya sumcadda iyo ujeedooyinka ururkan loo dhisay
D. Xil ka qaadista ku timaada sababaha ku xusan faqradaha X iyo KH ee qodobkan, waxay ku ansaxaysaa codka seddex meelood labo meel xubnaha Golaha Sare.

**QODOBKA 20aad**

**SHAQADA GOLAHA FULINTA**

B. Diyaarinta iyo u gudbinta Golaha Sare qorsha howleedka sannadlaha ah ee Golaha Fulinta.
T. Fulinta qorsha howleedka ururka ee uu Golaha Sare ansixiyay.
J. Diyaarinta miisaaniyad sannadeedka ururka iyo u gudbinta Golaha Sare.
X. Diyaarinta xisaabxirka miisaaniyadda dhamaadka sanad walba iyo u gudbinta Golaha Sare.
KH. Socodsiinta howlaha maalinlaha ah ee ururka iyo diiwaangelinta qalinjabiyeyaasha cusub.
D. Diyaarinta warbxin sannadeedka howlaha ururka iyo xogsiinta Golaha Guud ee ururka.

**QODOBKA 21aad**

**KULAMADA GOLAHA FULINTA**

Kulamada Golaha Fulinta waxaa isugu yeeraya, isla markaasna shir guddoominaya Guddoomiyaha Golaha Fulinta, haddii Gudoomiyuhu maqanyahayna Guddoomiye Ku Xigeenka Golaha Fulinta, haddii uu isaguna maqan yahay waxaa shaqada ii wadaayo cidda uu Gudoomiyuhu wakiisho.

**QODOBKA 22aad**

**DHAQAALAH URURKA**

Ilaha dhaqaalaha ururku waa:

B. Khidmadda Kaarka Aqoonsiga xubinnimada
T. Khidmada xubinnimada billaha ah ee laga qaado xubnaha Ururka.
J. Tabarucaad ay bixiyaan xubnaha ururka iyo mid ka baxsan xubnaha ururka.
X. Dhammaan lacagahan ku xusan faqradaha (B, T iyo J) ee qodobkan waa in ay ku dhacaan xisaabta ururka ee bangiga, waana in loo maamulo si waafaqsan Xeerka Maamulka Maaliyadda Ururka, oo ay caddahay lacag walba iyo halka ay ku baxday.

**QODOBKA 23aad**

**DHAQAN GALKA SHARCIGA**

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka ay ansixiyaan Golaha Sare ee Ururka Qalinjabiyeyaasha Soomaaliyeed ee Turkiga.

**Saxiixa Xubnaha Golaha Sare**

1. Fariida Ibraahim Nageeye
2. Khaalid Maxamed Barre
3. Mustafa Maxamed Cali
4. Cumar Cabdullaahi Cumar
5. Maxamed Suudi Guure
6. Nawaal Cabdullaahi Maxamed
7. Salaad Yuusuf Caddoow